

Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP) wuxuu kaalmeeyaa dadka lacag yar qabaan ama aan wax lacag ah ba qabin inay ka soo gadaan cunto kuna karsadaan cunno caafimaad leh dukaamada barnaamijka ka qayb gelaan. Kaalmada SNAP waxay kordhisaa awoodda qoyska ee gadashada cuntada markii lagu soo daro lacagta kale ee qoyska usoo gelaa.

Reer waa qof walboo, qoys ama koox dad ah oo ay isla noolaadaan, isla gadaan isna la cunaan cuntada. Reer kastoo daboolaa dakhliga aasaasiga iyo shuruudaha kale waxaa laga yaabaa inay helaan kaalmada cuntada ee SNAP.

Sida aad u codsato kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah ee loo yaqaano SNAP:

- Soo wac – 1-855-306-8959; ama
- Kasoo gudbi Codsiga dalbashada barta interneedka <https://kynect.ky.gov/> ; ama
- Soo booqo xafiiska degaanka ee DCBS si aad u codsato qof ahaan; ama
- Kasoo daabac codsiga bogga dambe, soo buuxi una soo celi xafiiska degaanka ee loo yaqaano DCBS ama boosta kusoo dir ; DCBS, P.O. Box 2104 Frankfort, KY 40602

Haddii aad dhib kala kulanto la xiriirkeena sababta oo ah Af Ingiriis kuma hadli kartid ama waxaad tahay qof curyaan ah, fadlan nala socodsii.

Kaalmo la xiriira tarjumaadda Afka oo lacag la'aan ah ama kaalmooyin kale iyo adeegyo ayaa jiraan haddii aad codsato.

Haddii aad ka dalbato interneedka ama ka daabacdid codsiga interneedka soona celisid, waxaa loo baahnaanaa wareysi intii aan codsigaada la ansaxin. Meesha uu ku yaalo xafiiska Kaalmaynta Qoyska iyo cinwaanka boostada wuxuu ku qoran yahay halkan hoose. Kaalmada waxay bilaabmaysaa taariikhda codsigaada la helay.

Reerkaaga waxay magacaabi karaan qof kale inuu noqdo wakiilka reerka oo uga qayb gelaa wareysiga SNAP iyo inuu isticmaalo kaalmadaadi gadashada cuntada reerkaaga.

Haddii reerkaaga u baahdo kaalmo deg-deg ah, waxaad heli kartaa kaalmada SNAP maalmo yar kadib markii aad gudbiso codsigaaga, haddii:

- Qarashka ijaarka/daynta guriga ee moorgeej iyo biyaha/nalka bil walbo uu ka badan yahay dakhligaada guud; ama
- Dakhligaada guud ee bil walbo uu ka yar yahay 150 doolar iyo ilaha kale sida lacagta caddaanka ah ama xisaabta bankiga uu dhan yahay 100 doolar ama ka yar; ama
- Xubnaha reerkaaga ay ku jiraan muhaajiriin waxba haysan ama shaqaalaha beeraha xilliyadeed.

Codsadeyaasha SNAP waxay xaq u leeyihiin in ay:

- Soo gudbiyaan codsiga SNAP isla maalinta ay la xiriiraan xafiiska DCBS si ay u codsadaan kaalmada.
- Lasoo wargeliyo haddii kaalmada SNAP loo oggolaadey ama loo diiday 30 maalmood gudahood markii ay codsadaan.

- Helaan kaalmada SNAP maalmo yar ka dib haddii aay xaq u leeyihiin, ay qabaan lacag yar ama wax lacag qabin, soona buuxiyaan shuruudaha looga baahanyahay dakhliga.
- In ay codsadaan dhageysi dacwad, haddii aay kasoo horjeestaan waxii go'aan ah ee laga sameeye kiiskooda.

Haddii aad u baahantahay macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan kaalmada SNAP, fadlan lasoo xiriir DCBS oo lambarkooda yahay 1-(855) 306-8959.

Iyadoo la tixraacaayo Sharciga dawladda Federaaliga ee xuquuqda dadweynaha iyo Qaybta Beeraha Dawladda Maraykanka (USDA) Xeerka xuquuqda dadweynaha iyo siyaasadaha, USDA, hay'adaheeda, xafiisyadeeda, iyo shaqaalaha, iyo macaahidyadeeda, ka qayb gelaan ama maamula barnaamijka USDA waxaa loo diidanyahay in ay dadka kala baxiyaan qolooyin, midab, dalka asalka, jinsi, Diinta ay rumeysanyihiin, curyaanimo, da', siyaasadda uu qofka rumeysanyahay, aar-gudasho ama aarsi la xiriira dhaqdhaqaaq xuquuq dadweyne hore oo ka mid ahaa barnaamij ama dhaqdhaqaaq uu sameeyay ama maalgeliyey hay'adda USDA.

Dadka naafada ah ee u baahan kaalmo ay ka helaan macluumaadka barnaamijka (Sida farta indhoolayaasha ee la yiraahda Braayil, Daabac waaweyn, cajalo la dhagaysto, Luqadda Dhegoolayaasha ee tilmaanta la yiraahdo Ameerikan Saayin Laanguweej, iwm.) waa inay lasoo xiriiraan Hay'adda (Dawladda ama Degaanka) meesha ay ka dalbadeen kaalamada. Dadka Dhegoolayaasha, dhib ku qabaan maqalka ama ay qabaan naafada hadalka waxay kala soo xiriiri karaan USDA Adeega Federaaliga ee loo yaqaano **Federal Relay Service** oo lamabarkooda yahay (800)877-8339. Waxaa kaloo ay ka heli karaan macluumaadka barnaamijka afafka kale oo aan ahayn Afka Ingiriisiga.

Si aad u gudbiso dacwo ku saabsan midab kala sooc la xiriirta barnaamijka , buuxi Foomka Cabashada Midab kala Sooca ee Barnaamijka USDA, (AD- 3027) ee laga helo barta interneedka: <http://www.ascr.usda.gov/complaint.filing.cust.html>, iyo xafiis walbo ay leedahay USDA, ama usoo qor warqad USDA adigoo siisaa dhammaan macluumaadka lagaa codsado foomka. Haddii aad rabto in aad codsato koobiga foomka cabashada/dacwada, soo wac lambarka (866) 632-9992. Usuu dir foomkaaga oo la buuxiyey ama warqadda USDA sidatan:

- (1) Boosto: U.S. Department of Agriculture
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410;
- (2) Fax: (202) 690-7442; ama
- (3) Email: program.intake@usda.gov.

Fursadaha laga bixiyo Hay'addaan dadka oo dhan waa u simanyihiin.

Waxaa kaloo u gudbi kartaa cabashadaadi Golaha Caafimaadka iyo Adeegyada Qoyska, Xafiiska Maareynta Arrimaha Shaqaalaha , Faraca Cabashada sidatan:

Cabinet for Health and Family Services, Office of Human Resource Management, EEO Compliance Branch, 275 East Main Street, 5C-D, Frankfort, Kentucky 40621 ama soo wac (502) 564-7770 EXT 4107.

Haddii aad qabto cabashooyin kale ee ku saabsan Kiiskaaga SNAP, waxaad soo waci kartaa xafiiska Ombudsman's oo lambarkooda ah 1-800-372-2973 ama (TTY) 1-800-627-4702.

Haddii aad raali ka ahayn **arrin aan wax ku sameeynay codsigaaga** ku saabsan kaalmada SNAP, waxaad codsan kartaa dacwad dhagaysi ah **90 maalmood gudahood** laga bilaabo taariikhda aad naga hesho ogeysiin ku saabsan codsigaaga ee SNAP. Si aad u Codsato dhagaysi Dacwadeed ah:

Soo wac lambarka ah 1-855-306-8959; **AMA**

Soo qor sababta aad codsanayso dhagaysiga dacwada, saxiixo kuna soo qor taariikh warqadda , kadib: Sii warqadda xafiiskii noqda ee DCBS; **AMA**

Boosta kusoo dir: Cabinet for Health and Family Services, Division of Administrative Hearings
Families and Children Administrative Hearings Branch,
105 Sea Hero Road, Suite 2, Frankfort, KY 40601

FS-1 (Somali)
(R 10/18)
921 KAR 3:030

COMMONWEALTH OF KENTUCKY
Qaybta Adeegyada Caafimaadka Iyo Qoysaska
Qaybta Adeegyada Ku Aaddan Beelaha

Arjiga Codsiga SNAP

Barnaamijka Kaalmada Dheeraadka ah ee Nafaqada (SNAP) waa barnaamij loogu tala galey in uu ku kaalmeeyo gadasho cunto caafimaad fiican laga helo.

Haddii aad dhib ku qabto la xiriirkayna iyadoo sabab tahay aqoon la'aanta Afka Ingiriisga ama aad tahay qof naafo ah, fadlan nasoo wargeli. Markii aad codsato waxaa heli kartaa kaalmo tarjumaan luqadeed oo lacag la'aan ah ama kaalmo qalabeed kale iyo adeegyo

Sideen U Heli Karaa Kaalmada SNAP?

Tallaabada 1. Soo Buuxi arjiga.

Qof walbo waa buuxin karaa codsi. Ka jawaab su'aaladaha aad ka jawaabi karto badigood.

Haddii aad dalbanayso SNAP aadna buuxin Karin 8 bog ee warqadaha codsiga maanta, soo hubi in aad buuxiso boggaan, soona saxiix kadibna noo soo celi. Kadib soo buuxi warqadaha codsiga inta ka dhiman (bogga 2 ilaa 9) sida ugu dhaqsaha badan noogu soo celi.

Tallaabada 2. Noo soo celi warqadaha codsiga

Warqadaha codsiga waxaad ugu soo diri kartaa faks Xafiiska Qaybta Adeegyada Bulshada(DCBS) oo lambar-kooda ah (502) 573-2007 ama boosta kusoo dir xafiiska DCBS, P.O. BOX 2104 Frankfort, KY 40602. Ama waxaad keensan kartaa codsigaaga xafiiska DCBS marka uu furanyahay. Markii aan helno codsigaaga, Waxaad helaysaa tilmaamooyin wax kaa sheegaa sida aad ku buuxiso wareysiga. Waxaad xaq u leedahay in aad si deg-deg ah u ogaato haddii aad heli doonto kaalmo. **Taariikhda aan helno boggaan oo ku qoran magacaaga, cinwaankaaga iyo saxiixaaga ayaa waxaa bilaabma waqtiga aan go'aan ka gaarno haddii aad xaq u leedahay kaalmada SNAP. Waana taariikhda uu kuu bilaabmi doonto kaalmada SNAP haddii aad u qallantid kaalmo.**

Tallaabada 3. Nala hadal.

Markii lagu wareysanaayo, waxaan kaa rabnaa in aad na tusto:

- Caddeyn qofka aad tahay, sida liisanka baabuur wedista, Kaarka sooshiyal sekuriti ama dokumentiga shisheeynimada;
- Caddeyn ku saabsan dadka gurigaada ku nool, sida kontaraatada guriga ama caddeyn qoraal ah;
- Caddeyn in aad deggantahay Kintaaki;
- Caddeyn in aad bixiso qarashka daryeelka carruurta ama nafaqo carruur aad bixisay;
- Caddeyn ku saabsan qarashka nololshaada; iyo
- Caddeyn lacagta kusoo gashey 60ka maalmood ee lasoo dhaafey, sida dabada jeegagga.
- ***Haddii aadan keeni Karin wax walbo, Dhameystir wareysiga. Anaga ku caawineynaa**

*Macluumaad Ku Saabsan Lambarada Sooshiyal Sekuuriti

Waxaad dooran kartaa in aad na siiso Lambarada Soshiyaal Sekuuritiga qof walbo ee gurigaada deggan. Waxaan siin karnaa kaalmada SNAP keliye dadka na siiyaa Lambarka Sooshiyaal Sekuuritigooda ama na siiyaan caddeyn ku saabsan in ay dalbadeen Lambarka Sooshiyaal Sekuuriti. Lagaa ma rabo in aad na siiso Lambarka Sooshiyal Sekuuriti dadka aadan u dalban kaalmada SNAP.

Naftaada Wax Nooga Sheeg

Magaca Sharciga:

(Magaca Dambe)

(Magaca Hore)

(Magaca Dhexe)

(Lamb. Sooshiyal Sekuuriti)

/ /
(Taariikhda Dhalashada)

(Cinwaanka wax lagu soo diro)

(Magaalada)

(Gobolka)

(Sib Kood)

Degmada aad Deggantahay _____ Lambar Telefoon(_____) _____ Kaaga deriska

Cinwaanka waddada aad deggantahay hadduu ka duwanyahay midka wax lagu soo diro, kusoo qor halkan hoos:

Magac: _____ Lambarka Sooshiyal Sekuuriti: _____
(Ka fiirso Bogga 1aad(1) waxii la xiriiraa lambarada Sooshiyal Sekuuriti)

(Cinwaanka Waddada)	(Magaalada)	(Gobolka)	(Sib Kood)
Saxiixa/Calaameey (X)	Markhaati haddi aad ku qorto X	Taariikda Maanta / /	

*Haddii aad kaalmo u baahantahay buuxinta foomkan,, soo wac (855) 306-8959. Waxaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan xafiiska deegaanka: https://prd.webapps.chfs.ky.gov/Office_Phone/index.aspx

(Ka fiirso Bogga 1aad(1) waxii la xiriiraa lambarada Sooshiyal Sekuuriti)

Wax nooga Sheegi Baahidaada ku Saabsan Wada Xiriirka iyo Caawinaad Kale

Afka aad ku Hadasho: _____ Afka aad Qori Karto: _____

Afka Ingiriisiga Ma Ku Liita? Haa Maya

Ma u baahantahay qof tarjumaan ah marka aad leedahay ballanka wareysiga? Haa Maya Haddii Haa ay tahay, Afkee? _____

Ma tahay qof naafo ah oo kaalmo u baahan? Haa Maya, *Haddii Haa ay tahay, soo calaameey waxa ay tahay:*
 Tarjumaan Tilmaan ahaan ah wax kuu sharxa (dadka dhegoolka ah) Tarjumaan Wax Tusid iyo Timaan
 Tarjumaan Hadal ah Tarjumaan la socda wax taabasho ama dareen Tarjumaan Qalabka Fiidiyooga iyo Tilmaan isla Socdaan Tarjumaan Kombiyuutar la isticmaalo si loo waco telefoonka caadiga Farta dadka Indhoolaha ee Braille
 Far Waa-Weyn Wada Xiriirka Elektroonika(E-meeyl) Kursiga lagu socdo Wax Kale: _____

Macluumaad Ku Saabsan Xaaladda Imigreeshanka (Joogitaanka Dalka)

Waxaad u codsan kartaa kaalmada SNAP reerkaada xitaa haddii qaar ka mid ah xubnaha qoyska aan xaq u lahayn kaalmada xaaladdooda joogitaanka dalka darteed. Tusaale ahaan, Waalidiinta aan lahayn sharciga joogitaanka dalka waxay u dalban karaan kaalmada SNAP carruurtooda oo ah muwaadiniin Maraykan ah ama sharci ahaan ay xaq u leeyihiin. Dadka aan lahayn sharciga joogitaanka dalka xaq uma yelaanaayi kaalmada SNAP. Anaga lama xiriirayno Xafiiska Maraykanka ee Adeegyada Muwaadinnimo iyo Imigreeshanka (USCIS) waxii ku saabsan dadka aad noo sheegto in aanay qabin sharciga joogitaanka dalka. Laakiin waxaa qasab ah in aan isticmaalno dakhliga lacageed ee usoo gala iyo hantidooda si aan u qiimayno haddii dadka kale oo reerka ka mid ah ay heli karaan kaalmada SNAP. Kaa ma rabno in aad na siiso dokumentiyaasha ay ku yimaadeen dalka dadka aadan u rabin kaalmada SNAP. Waxaan ka baarnaa xaaladda imigreeshanka dadka aad codsiga u gudbisid Habka Xaqiijinta Shisheeynimada ee loo yaqaano Systematic Alien Verification System oo ay maamusho USCIS. Macluumaadka aan ka helno waxay saamayn ku yeelanaysaa Kaalmadaadi SNAP.

Goormaan Helaa Kaalmada Dheeraadka ah ee Nafaqada(SNAP)?

Magac: _____ Lambarka Sooshiyal Sekuuriti: _____
(Ka fiirso Bogga 1aad(1) waxii la xiriiraa lambarada Sooshiyal Sekuuriti)

Waxaa laga yaabaa in aad hesho kaalmada cuntada maalinta 5aad kadib markaad codsatid. Tan waxaa la yiraahda kaalmo la de-dejiyey. Haddii aad tan u qallantid, waxaan u baahanahay wax ka badan boggaan. Halkan hoose ka fiirso macluumaad ku saabsan Kaalamada la de-dejiyey ama anaga wax naga weydii.

Helista kaalmada cuntada, waxaa lagaa rabaa in aad buuxiso dhammaan codsigan. Waxaan u baahanahay dhammaan arjiga sidii aan go'aan uga gaari lahayn. Macluumaadka dheeraadka ah waxay naga caawisaa in hawl fiican soo qabano. Wax allaale waxii macluumaad aad hayso nasiin. Haddii aad kaalmo u baahanatahay, na weydii waan ku caawinaynaa. Waxaa laga rabaa in aad keento koobiga karaka aqoonsiga sida laysanka baabuur wedista, karaka sooshiyal sekuuriti, ama dokumentiga shisheeynimada.

Kaalmada La de-dejiyey-kaalmo cunto 5 maalmood gudahood:

Qofka kaalmada 5 maalmood gudahood heli karaa:

- Reeraha dakhligooda iyo hantidooda bileed uu ka yaryahay \$150; ama
- Reeraha ijaar bixiyaa, dayn iyo qarashka korontada iyo biyaha uu ka badan yahay dakhliga iyo hantida bileed ee reerka; ama
- Reeraha Qof Shaqo doon ah ama beeraley xiliyadeed oo qaba hanti dhan 100 doolar ama ka yar oo dakhligooda istaago ama bilaabo

Kaalmo Cunto 30 beri quadahood:

Haddi aadan helin Kaalmo Deg-deg ah, waxaad heli doontaa warqad kuu sheegaaya:

- Waxaad xaq u leedahay kaalmo cuntadeed iyo inta ay tahay, ama
- Xaq uma qabtid iyo sababta aadan xaq u yeelan kaalmada cuntada

Waxaad dalban kartaa kaalmada SNAP iyo kaalmo kale isku mar. Laakiin codsigaada SNAP waxaa la marsiin doonaa goonigiisa. Codsigaada kaalmada SNAP waxaa la marsiin doonaa iyada oo loo cuskanaaya sharciyada SNAP kadibna si deg-deg ah ayaa lagu ogeysiin doonaa waxii go'aan ah, laakiinse ma dhaafaayo 30 beri marka laga bilaabo taariikhda aan helno codsigaada oo saxiixan. Codsigaada SNAP lama celinaayo haddii codsiga kaalmada kale la diido ama ay kaa go'do kaalmo kale aad heli jirtey.

Anigu ma Dooran Karaa Qof I Kaalmeeya?

Waa dooran kartaa qof ku kaalmeeyaa. Lagaa ma rabo in aad sidaan ku dhaqaaqdo. Haddii aad sameesatid, qofkan wuxuu kuu buuxin karaa xaashida codsiga, kuu jawaabi karaa su'aalado, warbixin ka bixiyaa markii lagu wareysto, kuna gadan karaa cunto kaarkaaga EBT. Waxaa kaloo aan la qaybsan kamaa qofkaan macluumaadkaaga qofkan.

Fiiro Gaar ah: Dadka ku jira Xarumaha la isku carbiyo ka raysashada isticmaalka Daroogada ama Aalkolada waa in ay u xil saaraan qof shaqaale ah oo u dalba kaalmadan qof allaale qofkii meesha ku jira.

Qofka Wakiilka ah:

(Magaca Dambe)

(Magaca Hore)

(Magaca Dhexe)

(Cinwaanka Boostada)

(Magaalada)

(Gobolka)

(Sib Kood)

Taariikhda Dhalashada _____ / _____ / _____ (_____) _____
Bil Maalin Sanad Telefoon Lambar

Wax Nooga Sheeg Dadka Gurigaada Deggan

Magac: _____ Lambarka Sooshiyal Sekuuriti: _____
 (Ka fiirso Bogga 1aad(1) waxii la xiriiraa lambarada Sooshiyal Sekuuriti)

Reerka kaalmada cuntada hela waa qof ama koox dad ah oo isla noolyihiin ayna gataan isla kariyaan cuntada. Kooxda qasab ma aha in ay qaraabo ahaadaan. **Dadka hoos ku qoran waa in ay helaan hal kaalmo cuntadeed(SNAP) oo reerka dhan haddii isla noolyihiin xitaa haddii aanay isla gadan ama isla karsan cuntada:**

- Adiga iyo ninkaaga ama naagtaada,
- Carruurtaada ka da'yar 22 jir (xitaa haddii ay carruur qabaan),
- Waalid walbo qaba carruur ka da'yar 22 jir,
- Carruur kale aad korinayso oo ka da'yar 18 jir, iyo
- dhammaan dadka kale ee cuntada isla gadatiin islana karsatiin.

Tilmaan-bixin:

Qoraalka Hoose, Soo buuxi sanduuq walboo ku saabsan dadka gurigaada deggan. Haddii uu jiro aadan kaalmo ula rabin, ka jawaab "maya" su'aasha koowaad ee hoos ku qoran kadibna ku qor magacyadooda keliye, iyo xiriirka Idllnka dhexeeya, iyo taariikhda dhalashadooda.

Waxaan idiin weydiinaa qolada aad ku abtirsataan ama asal ahaan cidda aad tahay si aan u habsano in barnaamijka kaalmada dadweynaha loo qaybiyo iyadoo aan la fiirsan qolo, midabka ama dalka asalka qofka, laakiin qasab ma aha in aad ka jawaabto. Jawaabtaada wax kama saameyn doonto kaalmada aad hesho ama waqtiga ay qaadan doonto.

Hadii aad doorato in aad ka jawaabto su'aaladaha ku saabsan qolo, jinsi ama asal,soo isticmaal xuruuf sireedyada soo socda:

* Abtirsasho

**Qolo (Dooro waxii loo baahanyahay)

H = Isbaanish ama Latiino
 N = Ma aha Isbaanish ama Latiino

B = madoow ama Afrikaan Maraykan N=Native Hawaiian/other Pacific Islander

I =Hindida Maraykanka or Asalka u dhashay Alaaska

A=Eshiyaan

*** dadka qaarkood waa inay oggolaadaan inay isdiwaan geliyaan shaqo raadis, soona raacaan sharciga shaqada/tababarka si ay u helaan kaalmada cuntada SNAP. Fadlan soo caddeey haddii uu qof walbo oggolyahay inuu isdiwaan geliyo. Waan kula socodsiinaynaa haddii sharciga shaqada/tababarka uu saameeyo xubnaha reerkaaga.

Lo codsana Haa/Maya	waa Isla Gadana Isla cuna	Magaca hore, Dhe Magaca Damb	Sooshiyaal Sekuuriti Lambar (#)	Xiriirka Idiink Dhaxeeya	Taariikhda dhalashada	Sex M or F	*Abtirsi	**Qolo	Muwaadin Haa/Maya
1.				Naftaada	/ /				
2.					/ /				
3.					/ /				
4.					/ /				
5.					/ /				
6.					/ /				
7.					/ /				
8.					/ /				

Magac: _____ Lambarka Sooshiyal Sekuuriti: _____
(Ka fiirso Bogga 1aad(1) waxii la xiriiraa lambarada Sooshiyal Sekuuriti)

Xasuusin: Saxiixayga bogga 7aad, waxaan waafaqsanahay in dhammaan xubnaha reerkayga ee looga rabo in ay raaci doonaan sharciga u degsan shaqada iyo tababarada shaqada.

Magac: _____ Lambarka Sooshiyaal Sekuuriti: _____
Ma jiraa qof qabaa Kaarka EBTga Kintaaki? Haa Maya Yaa Waaye: _____
Kusoo qor halkan Qof walboo ah 18 jir ama ka weyn oo dhigta Jaamacad ama Dugsi Ganacsi ah: _____
Ma jiraa qof ka hela kaalmada SNAP gobol kale? Haa Maya Gobolkee? _____
Ma jiraa qof gurigiina ka mid ah oo lagu eedeeyey dembi ah bixis macluumaad qalad ah oo ku saabsan qolada aad tihiin ama meesha aad deggantihiin si aad heshaan ama isku dey in aad ka heshaan kaalmada SNAP wax ka badan hal reer hal mar sidii taariikhda 8/22/96 Haa Maya Yaa Waaye? _____

Ma jiraa qof dembiile baxsadey ama jebiyey xabsi kasii deyn tijaabo/sharafeed ah? Haa Maya Yaa Waaye?

Ma jiraa qof lagu xukumey dembi darooga sidii 8/22/96? Haa Maya Yaa Waaye? _____

Ma jiraa qof lagu qabtey dembi gadasho, iibsasho am aka ganacsi kaalmada SNAP hub, rasaas, ama walxaha qarxa laga bilaabo 8/22/96 Haa Maya Yaa Waaye? _____
Ma jiraa qof guriga ka mid ah oo lagu qabtey dembi ku ganacsi kaalmada SNAP darooga waxii ka dambeeyaa 8/22/96?

Waa Maxay Qarashka Ka Baxa Reerkaaga?

Si aad u hesho wax badan kaalmada cuntada, noo soo sheeg biilashaada. Haddii aadan noo wargeiin ama caddeyn noo keenin qarashka kaa baxa waxaa loo arkaa caddeyn ah in aadan rabin in aad hesho ka jaridda qarashka aan la sheegin. Halkan hoose, wax nooga sheeg qarashka reerkaaga ka baxa.

Guriga iyo waxyaabaha la Isticmaalo

Waa maxay qaybta uu ka bixiyo reerkaaga waxyaabaha hoos ku qoran:

Ijaar guri: \$ _____ bil walbo
Ijaar Dhul: \$ _____ bil walbo
Deynta Guriga: \$ _____ bil walbo

Haddii aad bixiso canshuurta ama caymiska gooni ahaan ka ah deynta guriga, inta ay tahay hoos ku qor:

Canshuurta guriga: \$ _____ Muddada _____
Caymiska Guriga aad leedahay: \$ _____ Muddada _____

Dhinac ka calaameey sanduuqa qarashka lagaa rabo in aad bixiso:

Nal/Koronto Biyaha ama Meesha Wasaqda Maro
Gaas Qashinka iyo Wasaqda
Telefoon Lacag kale kuwa guriga ka kireystay kaa qaateen
Wax kale, Soo caddeey _____

Ma jiraan qarash aad bixisay oo ku saabsan kululeynta ama qaboojinta guriga? Haa Maya
Ma ka heshay kaalmada Tamarta (LIHEAP) sanadka lasoo dhaafey cinwaankaaga? Haa Maya

Qarashka Daaweynta

Haddii aad qabto qarash caafimaad qof ka da'weyn 59 jir ama curyaan aan ka bixinin caymis, noo soo sheeg. Qarashkan wuxuu noqon karaa mid takhtar ah ama biil Isbitaal, daawo, gaadiid, qarash caymis caafimaad, ama qarash kale oo daaweynta ku saabsan ah.

Magac: _____ Lambarka Sooshiyal Sekuuriti: _____
 (Ka fiirso Bogga 1aad(1) waxii la xiriiraa lambarada Sooshiyal Sekuuriti)

Yaa Bixiyaa: _____ Lacagta: \$ _____ bishii

Daryeelka Carruurta ama Dad Waaweyn

Haddii aad qabto qarash daryeel carruur ama qof weyn adiga kula nool, noo soo sheeg.

Yaa la daryeela: _____ Qarashka daryeekla yaa bixiyaa: _____

Lacagta: \$ _____ bishii

Nafaqo Carruur

Haddii uu jiro qof bixiya nafaqo carruur maxkamad soo amrey, noo soo sheeg.

Yaa bixiyaa: _____ Lacagta: \$ _____ bishii

Kaalmeyn bixinta Qarashka

Haddii aad kaalmo ka hesho bixista qarashkaaga wax ka mid ah, noo soo sheeg:

Qarashkee La Bixiye?	Yaa Bixiye?	Lacagta La Bixiye?

Waa Maxay Raasumaalka Ay Qabaan Dadka Reerka Ka Kooban?

Soo qor iskudarka lacagta uu qof walbo qabo:

Lacag Caddaah ah \$ _____ Lacag Xisaab Banki Ku jirta/Kredit Yuniyon \$ _____

Suuqa lacagaha, Meel la Dhigay, Caddeymaha lacag kayd ah, ama raasmaal kale \$ _____

Waa Maxay Lacagta Reerkaaga Soo Gasha?

Kusoo qor magacyada dadka iyo dakhliga bisha. Haddii aad soo dhaafto eber, waxaan u qaadanaynaa in aysan jirin wax lacag soo gashey. Kusoo xir xaashi kale haddii loo baahanyahay.

Lacagta Meesha ay kaasoo gasho	Yaa Soo Geliya Lacagta	Lacagta Bishii	Shaqaaleeye (Hadduu jiro)
Lacagta Shaqada oo canshuur Laga jarin (Isku Jir)			
Lacagta Shaqada oo canshuur Laga jarin (Isku jir) shaqo 2aad			
Iskiis U-Shaqeeye ama Shaqo Markii la helo la qabto			
Bakhshiish			
Sooshiyaal Sekuuriti ama SSI			
Kaalmada Askarnimo muddo Dheer ama Hawlgabnimo			
Lacag Shaqo la'aan ama Magdhawga shaqaalaha			

Magac: _____ Lambarka Sooshiyal Sekuuriti: _____
 (Ka fiirso Bogga 1aad(1) waxii la xiriiraa lambarada Sooshiyal Sekuuriti)

Nafaqo Canug ama Sadaqo			
Lacag Saaxiib ama Qaraabo Ku Siiye			
Dakhli Kale			

Ma jiraa qof shaqo la siiye laakiin aan lacag la siinin? Haa Maya Yaa Waaye? _____

Ma jiraa qof shaqo ka tagay 30ka maalmood ee la soo dhaafey? Haa Maya Yaa Waaye? _____

Ma jiraa qof shaqaale muhaajir ama mid xilli beereed ah? Haa Maya Yaa Waaye? _____

Ma jiraa qof Shaqo ka-fadhiisi ku jira? Haa Maya Yaa Waaye? _____

Sharciga SNAP

Ku soco sharcigaan:

- **Ha** qarinin ama ha bixin warbixin been ah si aad u hesho kaalmada cuntada ee SNAP.
- **Ha** isticmaalin kaalmada cuntada SNAP in aad ku gadato waxyaabaha aan cuntada ahayn sida alkolada ama tubaakada.
- **Ha** ku ganacsan, hana ku iibin ama ha iska bixin kaalmada cuntada ee SNAP.
- **Ha** isticmaalin kaalmada cuntada SNAP ee qof kale leeyahay.
- **Ha** ku isticmaalin kaalmada cuntada SNAP dad ka baxsan dadka gurigaada uu ka koobanyahay.
- **Ha** ku isticmaalin kaalmada cuntada SNAP bixiska deynta xitaa haddii ay tahay cunto lagu bixiyo SNAP.
- La wada shaqey shaqaalaha dawladda gobolka iyo tan dhexe dib u raajicista tayada hawsha la qabtey.

Ganaaxa SNAP

Qof allele qofkii jebiya sharciga kor ku qoran:

- **Ma** helaayo kaalmada cuntada muddo 1 sano marka hore, 2 sanadood markii labaad, marka saddexaadna weligiisa ma helaayo kaalmo cunto.
- **Waxaa** la ganaaxa ilaa \$250,000 ama la xiraa ilaa 20 sanadood, ama labaduba; iyo
- **Haddii** maxkamadda kusoo oogto in aad gadaneyso, iibinayso ama ka beecmushtareyso wax ka badan \$500 kaalmada cuntada, weligaada ma helaysi kaalmo cunto.
- **Haddii** maxkamadda kaa hesho dembi ah ku ganacsiga kaalmada cuntada rasaas, hub, ama waxyaabaha qarxa, waxaa lagaa jaraa kaalmada weligaada.
- **Haddii** maxkamadda kaa hesho dembi ah in aad ku ganacsaneyso kaalmada cuntada mukhaadaraadka, waxaa lagaa jeraa marka koowaad kaalmada muddo laba sano, marka labaadna weligaada ma helaysi kaalmo cunto.
- **Ma** helaysi kaalmo cunto muddo 10 sano ah haddii lagaa helo dembi ah qaadasho iyo deyd ka qaadasho kaalmo cunto meel ka badan hal reer isku mar. Ganaaxan wuxuu ka yimaada haddii aad bixiso warbixin been ah qofka aad tahay iyo meesha aad deggantahay.

Magac: _____ Lambarka Sooshiyal Sekuuriti: _____
(Ka fiirso Bogga 1aad(1) waxii la xiriiraa lambarada Sooshiyal Sekuuriti)

- Ganaaxa halkan ku qoran waxaa usii dheer, maxkamad laga yaabo in ay kaa joojiso kaalmada SNAP muddo siddeed iyo toban bilood kale haddii lagaa helo dembi ah in aad jebisay sharciyada kor ku xusan.
- Ma heli doonto Kaalmada SNAP haddii aad qarinqayso ama ka dhuumaneyso sharciga xukun, in lagu xiro ama jebinayso xaalad tijaabo ama sharafeed laga soo daaye xabsi.

*****Bixinta macluumaad qalad ah si kas ah waxay keentaa in tallaabo sharci ah lagugu qaado, dembiile criminal ama mid madani ah. Waxaa kaloo laga yaaba in kaalmada lagaa yareeyo ama lagaa gudo.***

Macluumaadkaaga Maxaan Ku Qabanaa

Haddii aad na siiso macluumaad been ah, waxaan kaa joojinaynaa kaalmada cuntada. Waxaan jawaabtaada u gudbinaynaa saraakilsha sharciga ilaaliya in ay gacanta ku dhigaan dadka ka baxsanaaya sharciga. Haddii lagu siiye kaalmo dheeraad ah ee cunto, waxaanu jawaabtaada siinaynaa hay'adaha dawladda federaaliga iyo tan goboleedka si ay kaa qaataan waxii aad qaadatey. Waan ka joojinaynaa caawimaadda dadka haddii aadan na siinin lambarka Sooshiyaal Sekuuritigooda. Waxaan isticmaaleynaa lambarka Sooshiyal Sekuuritiga lana siiyo si isku mid sida dadka kale oo helaan caawimaadda. Ma siinayno lambarkaaga Hay'adaha Muwaadinnimada Maraykanka iyo Adeegyada Imigreeshanka (USCIS)

Sharciga Ilaalinta Sirta Shakhsiga

Aruurinta macluumaadkan, oo ay ku jirto lambarka sooshiyaal sekuuriti (SSN) ee qof walboo reerka ka mid ah, waxaa ruqseeye sharciga Cuntada iyo Nafaqada ee 2008, laguna beddelay sharciga, 7 U.S.C. 2011-2036. Macluumaadka waxaa loo isticmaala haddii reerkaaga uu xaq u leeyahay ama uu si wedi karo inuu u qaimo ka qayb galka Barnaamijka Kaalmada dheeraadka ee Nafaqada. Waxaan ka xaqiijinaynaa macluumaadkan barnaamijyada u dhigma ee kombiyuutarka. Macluumaadkan waxaa kaloo loo isticmaala in lala socdo u hoggaansashada sharciyada barnaamijka iyo maareynta barnaamijka. Macluumaadkan waxaa la siin kara hay'adaha kale ee dawladda federaaliga iyo tan gobolka wax baaris gaar ah danted, iyo saraakiisha ku shaqa leh dhaqan gelinta sharciga sidii loo qaban lahaa daka ka baxsanaaya sharciga. Haddii lagu soo oogo reerkaaga dacwad ku saabsan fuud stambka, macluumaadka ku qoran codsiganm uuna ka mid yahay dhammaan SSNka waxaa loo gudbinaaya hay'adaha dawladda Federaaliga iyo kuwa Gobolka, iyo sidoo kale hay'adaha gaarka ah ee deymaha aruuriya sidii tallaabo ku lacag celis ah ku dhaqaaqi lahaayeen.

Waan Baarna Waxaad noo Sheegto

Waxaan isticmaalnaa hab kombiyuutareed xaqiijinta dakhliga qoyskaaga iyo sidii loo sameyn lahaa u dhigmashada kombiyuutarred ee hay'adaha Xafiiska Shaqaaleynta iyo Tababarada, Adeega Dakhiiga Canshuurada dalka iyo ilo kale oo wax laga fiiriyo inuu isuu dhigmo jawaabahaaga. Haddii waxii aad noo sheegtay uu ka duwanyahay waxaa kombiyuutarka noo sheega, waan baareynaa midka saxa. Waxaan maclumaa heli karnaa inaga oo la xirirnaa meesha aad ka shaqeyso, bankigaaga ama dad kale. Haddii uu qayb ka mid ah macluumaadka codsigan sax ahayn, kaalmada cuntada waa la diidaaya adigana waxaad noqonaysaa dembiile sharciga loo tiigsanaaya bixinta macluumaadka beenta ah adigoo ogsoon. Macluumaadka aad na siiso waxaa baara saraakiil ka tirsan dawladda fereraaliga, dawlad goboleedka, iyo kuwa deegaanka si ay u bubiyaan in ay ren tahay. Waxyaabaha aan baarno waxaa ka mid ah dadka ku qoran reerka: Lambarkooda Sooshiyal Sekuuriti, shaqada iyo lacagta la siiyo, lacagta xisaabta bankiga, lacagaha aad ka heshay ilaha kale sida sooshiyal sekuuriti ama shaqo la'aanata, iyo xaalad shisheeyenimo.

Laga Ma Takooraayo Arrimaha Lid Ku Ah

Iyadoo la tixraacayo sharciga xuquuqda madaniga ee Dawladda Federaaliga, siyaasadda iyo xeerarka Qaybta Beeraha Maraykanka(USDA), hay'adda USDA, Wakiiladeeda, xafiisyadeeda, iyo shaqaalaha, iyo

Magac: _____ Lambarka Sooshiyal Sekuuriti: _____
(Ka fiirso Bogga 1aad(1) waxii la xiriiraa lambarada Sooshiyal Sekuuriti)

hay'adaha ka qayb qaata ama maamula barnaamijyada USDA waa ka mamnuuc in ay dadka kala dhaqanto arrimo ku saleysan qolo, midab, dalka asalka, jinsiga, da', curyaanimo, diin, siyaasadda qofka aaminsanyahay, aarsasho, ama aarsasho ka yimid dhaqdhaqaaq xuquuq hore ee barnaamij walboo ama shaqo qabtay ama maal geliyey USDA.

Dadka curyaanka ah ee u baahan kaalmo wada xiriirka ku saabsan macluumaadka barnaamijka (sida farta indhoolayaasha ee Braille, Far Waaweyn, Cajal Maqala ah, Afka Tilmaanta ee Maraykan ah, iwm.) waa inay la xiriiraan Hay'adda (Dawladda ama Xafiiska Deegaanka) meesha ay ka codsadeen kaalmada. Dadka dhegoolka ah, dhib ku qaba maqalka ama hadalka dhib ku qaba waxay lasoo xiriiri karaan USDA iyagoo isticmaalayaan Adeegga Dawladda Dhexe ee Relay lamabrkiisa ah (800)877-8339. SidIntaas waxaa u dheer in macluumaadka barnaamijka laga heli karo Afaf kale oo aan Ingiriis ahayn.

Haddii aad rabto in aad gudbiso dacwo ku saabsan midab kalasooc, soo buuxi foomka Dacweynta Midab Kalasoooca Barnaamijka USDA, (AD-3027) oo laga helo interneedka barta: http://www.asrc.usda.gov/complaint_filing_cust.html, iyo xafiis walbo ee USDA, ama usoo qor warqad USDA, kuna soo qor dhammaan waxii macluumaad ah ee foomka looga baahanyahay.

Haddii aad rabto in lagu soo diro foomka Dacwo Gudbinta, soo wac (866)632-9992. Usuu gudbi foomkaaga marka la buuxiyo ama warqaddaada USDA cinwaanka ah:

- (1) Boosto: U.S. Department of Agriculture
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Ave. SW, Washington D.C., 20250-9410
- (2) Faks: (202) 690-7442; ama
- (3) E-meeyl: program.intake@usda.gov.

Hay'addaan wa Mid dadka oo Dhan Xuquuqdooda u wada Simanyihiin

Saxiixaaga Iyo Wax Fahamkaaga

Waxaan fahamsanahay:

- Su'aaladaha codsigan ku qoran iyo waxyaabaha igu dhaci karo haddii aan qariyo macluuumadd ama bixiyo macluumaad been ah.
- Waaa in aan bixiyaa caddeyn ku saabsan macluumaadka reerkayga.
- Xafiiska dobs iyo xubinta kontoroolka Tayada waxay la xiriira dad kale ama ururo si ay uga helaan caddeyn ku saabsan macluumaadkayga.
- Macluumaadka aan ka bixiye codsiga oo ay ka mid tahay macluumaadka quseysa muwaadinnimada.
- Xaaladda shisheeyenimo waxaa loo gudbinaaya xaqiijinteeda saraakiisha dawladda Federaaliga, dawlad Goboleedka iyo kuwa deegaanka si ay go'aan ka garaan haddii uu macluumaadka run yahay.
- Maadaama aan ahay qof codsanaaya kaalmo cunto, waxaa la iga rabaa in aan bixiyo lambarada sooshiyal sekuuritiga qof walbo ku nool gurigeyga oo aan u dalbanaayo kaalmo. (Lamabarada sooshiyaal sekuuriti iyo xaaladda imigreeshanka lagaa ma rabo dadka aan dalban laalmo cunto).
- In lamabarada sooshiyal sekuuritiga loo isticmaali doono xagga dawlad gobeledka iyo tan federaaliga u dhigmashada dakhliga iyo Habka Xaqiijinta Xaq u Yeelista (IEVS). Waxyaabaha la isku

Magac: _____ Lambarka Sooshiyal Sekuuriti: _____
(Ka fiirso Bogga 1aad(1) waxii la xiriiraa lambarada Sooshiyal Sekuuriti)

fiiriyo waxaa ka mid ah, laakiinse aan ku ekayn Sooshiyal Sekuuriti, IRS, SSI, Xasuus dhawrka mushaharka, caymiska shaq la'aanta, xasuus dhawrka meel marinta Nafaqada carruurta iyo waxyaabo kale oo u dhigma oo kazoo baxa talada IEVS. Macluumaadkan waxaa laga xaqiijiya xiriir lagu kalsoonyahay markii iskhalaaf laga helo. Macluumaadka laga helo IEVS, xaqiijinta kadib, wuxuu saameeyaa u qalmidda iyo inta ay noqon doonto qadarka lacagta kaalmada.

Waxaan oggolahay:

- In dhammaan xubnaha reerkayga ka mid ah ee looga baahanyahay ay raaci doonaan sharciyada shaqada iyo tababarada.

Waxaan caddeynaaya, aniga oo ilaalinaaya sharciga been sheegidda :

- In jawaabahayga ay sii buuxda sax u yihiin sida aan ogsoonahay.
- Jawaabahayga ku saabsan muwaadinnimada ama xaaladda shisheeyenimo ee wof walbo aan kaalmo u dalbadey ay sax yihiin.

Saxiisa/Calaameey (X)	Markhaati (haddii lagu saxilxo)	Taariikhda Maanta
		/ /

Maxay Yihiin Micnaha Ereyadeena?

Waxaan ka isticmaalna codsiga ereyadaan, Micnahooda waxaa waaye sidan:

Household Qof ama koox isla noolyihiin ayna gataan islana kariyaan cunto.

Quality Control Xubin ka mid ah DCBS oo dib u eega qaar ka mid ah kiisaska kaalmada cuntada si ay u ogaadaan in ay sax yihiin. Haddii kiiskaaga la doorto, xubinta Kontroolka Tayada way kula soo xiriiraaya.

Work and Training Rules Dadka qaarkood waxaa laga rabaa in ay shaqeeyaan ama tababar ka qayb gelaan si ay u helaan kaalmada cuntada. Haddii arrintan adiga ku quseyso ama dad kale oo reerkaaga ka mid ah, waan kuu sheegaynaa. Waxaa lagaa rabaa in aad raacdo sharciga shaqada iyo tababarka si aad u hesho kaalmo cunto.

Sidee Dacwo U Gudbin Kartaa

Waxaad codsan karto dacwo **muddo 90 maalmood** gudahood laga bilaabo marka aad naga hesho wargelin ku saabsan codsigaada kaalmada SNAP. Haddii aad kasoo horjeedo arrin wax laga yeelay codsigaada kaalmada SNAP. Waxaad nooga soo sheegi kartaa arrintaada dacwada marka la qabto ama waxaad keeni kartaa saaxiib, qaraabo, ama garyaqaan kuugu doodaa meesha dacwada laga qabto.

Sidee ayaan u furan karaa dacwo?

Soo Wac lambarka 1-855-306-8959; ama

Magac: _____ Lambarka Sooshiyal Sekuuriti: _____
(Ka fiirso Bogga 1aad(1) waxii la xiriiraa lambarada Sooshiyal Sekuuriti)

Kusoo lifaaq xaashi kale soo sharxaaya sababta aad codsatey dacwada, soo saxiix, taariikhna kusoo qor kaddibna usoo Celi xafiiska DCBS; ama
Usoo Dir: **Cabinet for Health and Family Services, Division of Administrative Hearings, Families and Children Administrative Hearings**
Branch, 105 Sea Hero Road, Suite 2, Frankfort, KY 40601

Bixinta macluumaadka Ikhtiyaarka ah

Waxay Naga Caawisa Caawintaada!

Lagaa ma rabo kan in aad saxilxdid, laakiin waxay naga caawisa helista macluumaadka aan u baahanahay kaalmeeyntaada, iyadoo looga baahnayn in la helo saxiixaagi codsiyada gaarka ah xaggooda

Waxaad Ogaata:

- Waxaan u baahnaaneynaa macluumaad dheeraad ah si aan go'aan ka gaarno haddii aad heli karto caawimaad.
- Haddii lagaa rabo macluumaad dheeraad ah, waxaad helaysaa warqad kuu sheegaaya waxyaabaha aan u baahanahy iyo taariikhda kama dambeysta lagaa rabo in aad noo keento.
- Waxaad mas'uul ka tahay lalista macluumaadka ama aad na weydiiso anaga in aan ku caawino helisteeda.
- Waxaa laga yaaba in aan isticmaalno ruqsadda so deynta hoos ku qoran si aan u helno macluumaadka aan u baahanyahay. Laakiin haddana waxaa lagaa rabaa in aad no keento macluumaadka aan ku weydiino ama caawimaad weydiisatid.
- We may be able to use the release below to get the information we need. **But you still have to provide information we request or ask for help.**
- Waxaan ku xiraynaa koobi ruqsaddaan foom weydiinaysaa dadka kale ama ururada (si qolada aad u shaqeyso) macluumaad gaar ah looga baahanyahay adiga ama dadka kale oo reerkaaga ka mid ah.

Kusoo qor Soona Saxiix magacaagi halkan hoose si aad na siiso ruqsad aan ku helno macluumaadka loo baahanyahay.

Magac: _____ Lambarka Sooshiyal Sekuuriti: _____
(Ka fiirso Bogga 1aad(1) waxii la xiriiraa lambarada Sooshiyal Sekuuriti)

Ruqsadda Bixinta Macluumaadka

Waxaa ku caddeynaaya in aan ruqsad siiye qof allaale ama urur in ay siiso macluumaadka la iga baahanyahay aniga ama dadka ka kooban reerkayga Qaybta Adeegyada Beelaha ku Aadan ee Kintaaki. Koobiga macluumaadkan wuxuu la mid yahay midka asalka. Ruqsaddaan kuma jirto macluumaadka la ilaaliyo ee caafimaadka ku saabsan. Ruqsaddaan wuxuu socon karaa muddo 12 bilood laga bilaabo taariikhda aad so saxiixdo.

Magacaaga (Fadlan si fiican kusoo qor Far Waaweyn)

Saxiix ama Calaameey

Markhaati (haddii lagu saxiixay calaamadda X)

Taariikh